# TALOOYIN BADBAADA DAAWOOINKA KU SAABSAN

Ka qayb qaadashada daryeelka cafimaadkaaga wuxuu caawiyaa ka hortagga qaladaadka daawooyinka. Mar walba hayso Liiska Daawooyinka ee aad qaadato kuna hayso boorsadaada ama jeebkaaga si aad dhaqso ugu hesho marka loo baahdo. Xusuusnow in dhakhtarkaaga, kalkaaliyaha caafimaadka, iyo farmashiistahaba ay diyaar u yihiin inay kaaga jawabaan wixii su'aalo ah ee aad qabto.

## Hayso Liiska Dawooyinka

Hayso liiska ay kuugu qoran yihiin daawooyinka aad qaadato, kuwaas oo ay ka mid yihiin, kuwa dhakhtarka kuu qoro iyo kuwa aad adiga iskaa u soo iibsatay, fitaminooyinka iyo nafaqada dheraadka ah. Foom aad liiskaas ku qoratid ayaad ka heli kartaa isbitaaka , rugta cafimaadka ama farmashiiyaha aad ku xiran tahay; waxaad kaloo foomkaas ka heli kartaa Badbaadada Bukaanka ee Minnesota(IBBM), oo layiraahdo Liiska Daawadeyda, oo aad ka heli kartid boga internetka www.mnpatientsafety.org ama telefoonka (651) 641-1121.

Ama waxaad ku bilaabi kartaa inaad ku qortid warqad cad liiska daawooyinka kala duwan ee aad qaadato. Marka aad liiskaas tustid (la wadaagto) dhakhaatiirtaada, kalkaaliyeyaashaada caafimaadka, farmashiisteyaashaada ama cid kale oo daryeel bixisa, liiskaas waxay ka helayaan wax alaale iyo wixii maclumaad ah oo ay u baahan yihiin ee qayb ka qaadan kara sidii aad cafimaad u qabi lahay. Liiska daawooyinkaaga wuxuu ka caawinayaa daryeel bixiyeyaasha inay hubiyaan in dawooyinka kala duwan ee aad isla qaadato ay yihiin kuwo adiga kugu haboon.

Inaad sameysato liiska ah daawooyinkaaga - oo aad mar walbana ka dhigto mid waqtiga la socda (casriyeysan) – waa talaabo sahlan oo aad qaadi kartid taas oo kaa cawineysa in aad cafimaadkaaga iyo badbaadadaadaba sugtid.

## Baro Dawo Kasta oo aad Qaadatid

Su'aalaha in aad is weydiineyso ay tahay waxaa ka mid ah:

- Waa maxay magaca daawo kasta?
- Maxaa daawadan loogu tala galay?
- Sidee bay u egtahay daawada?
- Waqtigeen qataa daawada?
- Qiyaas intee ah ayaan markiiba ka qadan karaa daawada?
- Sidee baan u qataa daawada?
- Cunnada miyaan la qataa daawada?
- Muddo intee dhan ayaan qaadanayaa daawada?
- Maxaan sameeyaa haddii aan seego hal waqti/kuuro oo daawada ah?
- Ma leedahay daawadan dhibatooyin iyada ka iman kara? Maxaan sameeyaa haddii aan dhibatooyinkaas isku arko?
- Sidee baan u keydiyaa?
- Amaan ma tahay daawadan in aan la qaato daawooyinka kale ee aan qaato, oo ay ka mid yihiin kuwa caadiga loo soo iibsado iyada oo aanu dhakhtar qorin, fiitamiinada ama kuwa dawooyinka geedaha/dhirta mudaawaadka ah?
- Ma jiraan cunno, cabitaan ama hawlo ay tahay in aan iska ilaaliyo inta aan daawadan qaadanayo?

Minnesota Alliance for Patient Safety
2550 W. University Ave., Suite 350-S
St. Paul, MN 55114-1900
Tel: (651) 641-1121;
www.mnpatientsafety.org

*MAPS (IBBM) waxay u mahadcelineysaa South Carolina Hospital Association (Ururka Isbitaalada Konfurta Carolina) kuwaas oo la wadaagey waxyaabihii aasaasiga u ahaa sameynta warqadda My Medicine List (Liiska Daawooyinkeyga). Waxa kale oo u mahad naqeynaa Ururka Joojinta Qaladdadka Daawooyinka ee, AHRQ and JCAHO.*

**Guriga**

- Marwalba Cusbooneysii Liiska Daawadada.
- Qaado daawada uu ku siiyo dhakhtarkaaga ama farmashiistaha. Ha la wadaagin daawo qof kale.
- Mar kasta ee aad qaadaneysid daawadaada, akhri maclumaadka ku qoran warqadda kiishka ama dhalada daawada ku dhegen si aad u hubiso in aad daawada u qaadaneysid sidii loogu tala galay. Haddii aad su'aalo qabto, wac dhakhtarkaaga ama farmashiistaha.
- Weligaa ha qaadan daawo adiga oo meel mugdi ah jooga.
- Ha u joojin qaadashada daawada cafimaad aad iska dareentay awgiis, waa inuu dhakhtarkaaga kuu sheegaa marka aad joojineyso.
- Mar walba haku jireen daawooyinka dhalooyinka(quraaradaha) ay ku yimaadaan ee lagu keeney.
- Ku keydii daawooyinkaaga oo dhan meel aanay ka gaari karin caruurta iyo xayawaanka guryaha jooga.
- Haddii aad daawo qaadato maalin kasta, waxaa kuu fiicnaan lahaa isticmaalka sanduuqa qayb qaybsan ee daawooyinka.
- Haku keydinin daawo gaariga gudihiisa, shooladda (makiinada) cuntadada lagu karsado agteeda ama musqusha, kuleylka iyo qoyaankaba waxay wax yeeli karaan sida daawada u shaqeyso.
- Baar taarrikhda ku qoran daawada. Tuur dhammaan daawooyinka dhacay iyo kuwa aan loo baahneyn. (Haddii daawada dusheeda aysan ku qorneyn waqtiga ay dhaceyso, ka soo qaad in ay dhacday haddii daawadaas aad heshey wax ka badan sanad ka hor).
- Haddii daawada aad qaadatid ay jiro kuu keeneyso ama kuu keento xanuun, si deg deg ah ula xiriir dhakhtarka.

**Xafiiska Dhakhtarka**

- Mar kasta sii qaado liiska cusub ee daawooyinka aad qaadato. Taa wuxuu dhakhtarka ku ogaanayaa dhamman daawooyinka aad qaadato, oo ay ka mid yihiin kuwa dhakhtar qoray , kuwa qofka iskiis uu u soo iibsado iyo kuwa geedaha/dhirta ah.
- U sheeg dhakhtarkaaga haddii ay jirto daawo xasaasiyad aad ka qaado ama hore jirkaaga diidmo uu ka muujiyey. Ku qor arrintaas liiskaaga daawada.

**Isbitaalka**

- Haddii isbitaalka lagu dhigo, hore u soo qaad Liiskaaga Cusub ee Daawada ama dawooyinkaaga oo dhan iyaga oo ku jira dhalooyinkii lagu keenay. Sidoo kale, soo qaad, dawooyinka aad adiga iskaa u soo iibsatay oo ay ka mid yihiin fitamiinada iyo kuwa dhirta/geedaha laga sameeyey.
- U sheeg dhakhtarkaaga, kalkaaliyaha caafimaadka, ama daryeel bixiye kasta haddii aad mar hore xasaasiyad ka qaaday daawo. Sidoo kale , ku qor xasaasiyadaas Liiska Dawooyinkaaga.
- Haddii aad dareensan tahay in nooc ka mid ah daawooyinka ay kuu keento jirro ama xanuun, si deg deg ah ula xiriir dhakhtarka ama kalkaaliyaha caafimaadka.
- Marka isbitaalka lagaa bixinaayo, weydii dhakhtarkaaga iyo kalkaaliyaha daawooyinka la rabo inaad qaadato, iyo sida loo qaadanayo. Waxaa lagu siin karaa Liis cusub oo daawooyin ah inta aadan isbitaalka ka bixin.

**Farmashiiyaha Marka aad Joogto**

- Sii liiska dawooyinka cusub ee lagu qoray iyo kordhinta kuwii hore isla farmashiiyihii aad horay uga qaadan jirtey daawada. Ka dib/bacdi farmashiistaha wuxuu haysanayaa liiska daawooyinkaaga. Isaga ama iyada ayaa hubinaaya in dhammaan daawooyinkaaga yihiin kuwo wada shaqeeya/la isla qaadan karo oo aan wax dhibaato ama xanuun ah kuu keeneynin.
- Haddii aad isticmaasho wax ka badan hal farmashiiye, hubi in mid kastaba haysto liiska daawooyinkaaga.
- Weydii farmashiistaha magaca daawada iyo sida aad u qaadaneyso. Hubi in waxa uu kuu sheego farmashiistaha iyo wixii uu dhakhtarkaaga kugu yiri in ay is waafaqsanyihiin.
- Hubso in daawada kordhinta ah ay leedahay midabkii, qiyaastii iyo qaabkii tii hore ee kaa dhamaatay. Haddii ay ka duwanaato tii hore, weydii sababta.
- Haddii aad WAX s'aalo ka qabto daawada, weydii farmashiistahaada.